WAALID/ DARYEELBIXIYAHA / WARQADDA OGGOLAANSHAHA IYO MACLUUMAADKA

Dabeecadaha Ardayga 2023 ee Xog ururinta Dugsiyedka

Waalidka / Daryeelbixiyaha / Masuulka Qaaliga ah

Warqadan ayaa ah in lagu wargaliyo waxa ku saabsan DabeecahaArdayga ee 2023 (AtoSS), oo ilmahaaga lagu casuumay inuu kaqeybqaato.

Ku saabsan xog ururinta

Waxaan qiimeynaynaa codka ardeyda oo aan uga danleenahay hagaajinta hawlgelinta ardeyda, fayoqabka iyo tilmaamaha tayada leh waxaana sameynaynaa xog raadin aan ku ogaaneyno siduu u arko ilmahaagu dugsigooda.

AtoSS waa xog raadin sannadeedka ardeyga oo ay sameyso Wasaaradda Waxbarashadu si ay uga caawiso dugsiyadu inay fahmaan sida ardeydu u arkaan dugsiga iyo waxay ka soo mareen. Ardeyda waxaa la weydiin doonaa firkooda iyo dareenkooda ku saabsan dugsigooda, waxbarashadooda, xirrirka ardeyda kale, u adkeysigooda, isu xoog sheegashada, caafimaadka iyo fayoqabka, nashaadkooda jir ahaaneed iyo nolosha guud ahaan.

Sannadkan, AtoSS waxaa lagu qaban doonaa dugsigaaga laga bilaabo 22nd of May 2023 – 2nd of June 2023.

Waa maxay faa'iidooyinka?

Dadka dhalinyarada ahi way ka helaan inay fekerkooda dhiibtaan! Xograadintaani waxay socotay ugu dhowaan 20 sanno waxay u leedahay qiimo weyn caawinta dugsiyada inay fahmaan aragtiyaha ardeyda, inay qorsheeyaan nashaad iyo barnaamijyo ay ku hagaajinayaan waxa ilamaaagu uu ka soo maray dugsigiisa. Jawaabaha xograadinta waxay sidoo kale caawinayaan Wasaaradda Waxbarashada inay fahamto sida loo sii hagaajin karo ardeyda khibradooda waxbarasho.

Waa maxay khataraha?

Anagoo aan ka qaybgelaynin khataro badan oo ka qaybgal , ardayda qaarkood waxaa laga yaabaa inay u qaataan su'aalaha wax shakhsi ah oo xaalad ahaan xasaasi ah. Haddii aad ogolaato in ilmahaagu kaqaybqaato, weli way u furan yihiin inay ka boodaan su'aalaha ama ay ka noqdaan marxalad kasta haddii xog ururinta ka xanaajiyo ama ku dhibtoonayo. Macalin ayaa joogi doona inta lagu jiro xograadinta lagu taageerayo dugsiyada.

Su'aalaha waxaa laga soo doortay qalabyada xog ururinta saxda ah ee laga isticmaalay Australia iyo dunidda, waa kuwo ku saleysan-awood, waxaana loogu talagalay kooxda fasal sanaddeed walba.

Muxuu ilmahayga laga codsan doonaa inuu sameeyo?

Cunugaaga waxaa lagy casumi doonaa inuu ku buuxiyo xog ururinta **online-ka inta lagu jiro waqtiga fasalka** iyada oo la isticmaalayo ujeedo ku dhisan qalabka xog ururinta online-ka oo ammaan. Waxaa muhiim ah in la ogaado inaanan sinnaba "u tijaabinayn" ilmahaaga. Fadlan ogow:

- Kaqeybgalka ardayda ee xog ururinta waa mid ikhtiyaari ah ardayduna way ka noqon karaan markay doonaan.
- Xog ururinta waxay qaadan doontaa 20-45 daqiiiqo si loo buuxiyo.

Sidee looga taxadari karaa sirta canugeeyga?

Ilmahaaga waxaa la siin doonaa login u gaar ah oo uu ku dhammaystiro xog ururinta macalinka. Soo galida ardaygu waa aqoonsi loo qoondeeyay oo loo isticmaali karo in lagu xiro xogta ujeedooyinka tirakoobka iyo cilmi baarista kaliya. Macluumaadka shakhsi ee la garan karo laguma diiwaangelin doono galka jawaabta xog raadinta si loo hubiyo qarsoonaanta jawaabaha ilamahaaga waa ilaashan yihiin wakhti kasta.

Sidee loo soo sheegayaa natiijooyinka?

Natiijooyinka xog ururinta waxaa dib loogu soo sheegi doonaa iskuulka qaab isku darka ah inta lagu jiro muddada daraasadda. Dhammaan xogta xog ururinta ee lagu diyaariyey warbixinnada waxaa loogu talagalay kooxaha ardayda oo keliya si aan loo aqoonsan karin arday gaar ah. Sharciyada xakamaynta xogta waxaa loo isticmaalaa iskuulada ay ku yar yihiin tirada ardayda sanadkiiba.

iskuulkaga waxaa laga yaabaa inuu la wadaago natiijooyinka xog ururinta waalidiinta, dukumiintiyada sida Warbixinta Sannadlaha ah ee iskuulka.

Ikhtiyaarrada kaqeybgalka

Ka qeybgalista xog ururintan waa **mutadawacnimo**. Haddii aad adigu **aadan** dooneynin inuu ilmahaagu sameeyo xograadinta, fadlan kaga bax adoo iimeyl u soo dirayaa dugsiga: hume.central.sc@education.vic.gov.au Fadlan sidaa samee ka hor 18th of May 2023 bilaabida inaan ka baxdo ka qaybqaadashada ilmahaaga, oo uu la socdo magaciisa iyo fasalkiisa.

Haddii dugsigaaga uusan ka helin emaylka Diidmada Oggolaanshaha adigu ka hor taariikhda bilowga xog ururinta ee lagu xusay warqaddan gudaheeda, waxay ka dhigan tahay inaad siiso oggolaanshahaaga inuu ilmahaagu ka qaybqaato Daraasadda 2023 ee Dabeecada Iskulk**.**

Koobi ka mid ah ra'yi ururinta aan weydiisaneyno cunugaaga inuu dhameystiro ayaa laga heli karaa dugsiga ilmahaaga. Fadlan la xiriir xafiiska maamulka haddii aad jeclaan lahayd inaad aragto xog ururinta ka hor intaadan gaarin go’aankaaga ku saabsan haddii aad jeclaan lahayd inuu ilmahaagu ka qaybqaato iyo in kale.

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah, fadlan la hadal macalinka ilmahaaga, ama la xiriir wasaaradda school.surveys@education.vic.gov.au.

Daacadnimaada

Wasaaradda Waxbarashada, Victoria

© State of Victoria (Wasaaradda Waxbarashada) 2023. Marka laga reebo haddii kale waxaa la qoray, in qalabka ku jira dukumiintigan loo bixiyey sida waafaqsan Hal abuurka Commons ka Sifada 4.0 Caalamiga ah Fadlan hubi ogeysiiska xuquuqda xafidan oo dhan